

WARBIXINTAA ISBADDALKA DAKHLIGA FOODSHARE

(Soo-sheegidda Reerka Yaraaday)

FOODSHARE INCOME CHANGE REPORT (Reduced Reporting Households)

Haddii saacaddahaaga bilaha ah ee aad shaqayso I dhimo in kayar 80 bishiiba ama dakhligaaga guud* ee soo gala reerkaada bil kasta uu ka badanyahay xadka dakhliga la soo sheego, sida lagu muujiyay hoos, waxaad isbaddalka u sheegtaa wakaaladaada xaafadda ugu dambayn 10ka bisha xigta. Haddii isbaddalka noocaas dhaco, waxaad:

- Isbaddalka ku soo sheegtaa internetka access.wi.gov.
- Buuxi warbixintaan kuna soo dir boostada ama faks ahaan:

Haddii aad ku nooshahay Dagmada Milwaukee:
MDPU
6055 N. 64th St.
Milwaukee, WI 53218
Faks: 888-409-1979

Haddii aadan ku nooleyn Dagmada Milwaukee:
CDPU
PO Box 5234
Janesville, WI 53547-5234
Faks: 855-293-1822

- Waxaad wici kartaa ama waxaad u geyn kartaa wakaaladaada. Waxaad sidoo kale cinwaanka iyo telefoonka wakaaladaada ka heli kartaa www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm ama marka aad wacdid 800-362-3002 ama 711 (TTY).

Tusaale ahaan: Waxaad bilowaysaa shaqo cusub 1-da bisha Agoosto taas oo ku siisa in ka badan waxa aad iminka sameysid iyo kiiskaada waxaa ku jira saddax qof oo qaata manaafacaadka FoodShare. Haddii dakhliga guud ee soo gala reerkaaga bil kasta bisha Agoosto ka badan yahay xadka dakhliga aad soo sheegtay ee \$2,888, waa in aad isbaddalka u sheegtid shaqaalaha FoodShare ugu dambayn Sateembar 10. Waxaad kaloo xisaabta lagaa rabo in aad soo sheegtid ka heli kartaa warqadii ugu dambaysay ee diiwaan gelintaada.

*Isugeynta dakhliga guud ee billaha ah macnaheedu waa wadarta dakhliga qof kasta oo reerkaada ka tirsan hela bil gudaheed kahor intaan wax la dhimin, sida canshuuraha iyo lacagaha laga reebo.

XadkaSoo-Sheegidda Dakhliga Bil Kasta Oktoobar 1, 2025, ilaa Sebteembar 30, 2026*			
Tirada Reerka	Xadka Dakhliga Bil Kasta	Tirada Reerka	Xadka Dakhliga Bil Kasta
1	\$1,696	6	\$4,675
2	\$2,292	7	\$5,271
3	\$2,888	8	\$5,867
4	\$3,483	9	\$6,463
5	\$4,079	10	\$7,059

*Qaddarkan dakhliga waxay ku saleysan yahiin tilmaamaha saboolnimada federaalka ee 2025–2026, taasoo isbeddesha Oktoobar kasta. Qof kasta oo dheeraad ah oo aqalka qoyska kusoo kordha, qofkiiba waxaad ku dartaa \$596 ee ah xadka dakhliga.

Waxaad sii wadi kartaa in aad soo sheegtid isbaddalada kale, sida isbedelka cinwaanka, guurka, dadyoowga ku kordha ama ka guura reerkaaga, ama hoos u dhaca ku yimaada dakhliga soo gala reerka bil kasta, hase ahaatee, lagaagama baahna in aad sidaas sameysid. Haddii aad dooratid in aad soosheegtid isbaddaladaan, la xariir wakaaladaada.

Macluumaadka shaqsiga lagu garan karo waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya maamulka tooska ah ee FoodShare.

Magacaaga	Nambarka Kiiska
-----------	-----------------

ISBADALKA DAKHLIGA IYO SAACADAHA

Isbadalka Saacaddaha Dakhliga iyo Mushaarka

Magaca Qofka Shaqeeyay		Loo-Shaqeeyaha	
Mushaarka Saacad Kasta	Saacadaha Halkii Todobaad	Inta Jeer la Bixiyo	Taariikhda la Bixiyo Mushaarka Kowaad
\$			

7 C.F.R. § 273.12(b)

ISBADDALKALE EE KU YIMAADA DAKHLIGA

(tusaale ahaan, manaafacaadka Soshal Sekuriti, hawlgabka, lacagaha W-2, manaafacaadka shaqo joojinta, masruufka cunugga iyo taakuleynta xaaska)

Magaca Qofka Qaata Dakhliga Aan La Shaqeysanin		Taariikhda Dakhliga Bilowday
Isha Dakhliga		Xisaabta Cusub Bil Kasta \$
Bisha Isbaddalka	Tirada Dadka ku jira Reerka	
Iskudarka Dakhliga Guud Aan La Shaqeysanin	\$	
Iskudarka Dakhliga Guud Shaqada Bil Kasta iyo Mushaarka	+ \$	
Iskudarka Dakhliga Guud Reerka Bil Kasta	= \$	

Ma fileysaa inay isbaddalada lagu soo sheegay foomkaan ahaan doonaan isla sidooda bisha xigta? ☐ Haa ☐ Maya
Haddii aysan sidaas ahayn, kusharax hoos.

Kharashka

Aniga waxaan fahamsanahay in kharashka aan soo sheego sida hooyga, danabka, xanaanada cunugga, tageerada ilmaha ama kharashka caafimaadka saamayn karaan heerka manaafacaadka FoodShare uu reerkeyga qaato. Aniga waxaan fahamsanahay in ku guuldareysiga soo sheegida ama xaqiijinta qarashka ay micnaheedu tahay inaan rabin inaan helo dhimista qarashkaan.

Yareynta Dakhliga

Aniga waxaan fahamsanahay in leyga baahneen in aan soo sheego hoos u dhaca ama luminta dakhliga; hase ahaatee, haddii aan sidaas sameeyo, waxaa dhici karto in aan xaq u yeesho mnaafacaadka FoodShare oo badan. Aniga Waxaan fahamsanahay in haddii aanan soo sheegin hoos u dhaca dakhliga qoyskeyga bil kasta ama luminta dakhli kasta oo reerka ah, ma heli doono wax koror ah oo ka dhashay faa'iideyda ee FoodShare.

DIGNIINTA CIQAABTA FOODSHARE

Xubin kasta katirsan reerkaada oo si ula kac ah u jebiya mid ka mid ah sharciyada soo socda waxaa laga mamnuuci karaa inuu helo FoodShare ilaa 12 bil jebinta kowaad kaddib, 24 bil jebinta labaad kaddib ama jebinta kowaad marka ay ku lug leedahay shay la kantaroolo, iyo si joogto ah xagga jebinta saddaxaad:

- In la bixiyo macluumaad been ah ama la qariyo macluumaad si loo helo ama loo sii qaato manaafacaadka FoodShare,
- Ka ganacsi, iibinta ama baddalaadda ee manaafacaadka FoodShare,
- Isticmaalka manaafacaadka FoodShare si loogu iibsado waxyaabaha aan raashinka ahayn, sida qamrada ama tubaakada, ama
- In la isticmaalo manaafacaadka FoodShare ee qof kale, kaararka aqoonsiga ee qof kale ama warqado kale.

Sida ku xeran qiimaha manaafacaadka sida qaldan loo isticmaalay, shakhsiga waxaa kaloo lagu ganaaxi karaa \$250,000, waxaana la xiri karaa ilaa 20 sanno, ama waxaa leysugu dari karaa labadaba. Maxkamad waxay kaloo ay kaa hor istaagi kartaa helitaanka FoodShare muddo 18 bil dheeraad ah. Sidoo kale si joogto ah ayaa lagaaga reebi doonaa haddii laguugu helo ka ganacsiga manaafacaadka FoodShare in la'eg ama ka badan \$500. Ma awoodi doontid inaad kaqaybqaadatid FoodShare 10 sano haddii laguugu helo inaad sameysay hadal been abuur ah ama marin habaabis ah oo ku saabsan aqoonsiga iyo hoyga si aad uhesho faa'iidooyin badan isla waqtigaas. Xag uma laha FoodShare dambiileyaasha baxsadka ah iyo kuwa jebiya muddada tijaabada/laga sii daayay xabsiga. Waxaa sidoo kale dhici karta in adiga laguugu qaado dacwad dheeri ah sida hoos timaada sharciyada kale federaalka ee lagu dabaqi karo.

Haddii manfacyada FoodShare aad ku ganacsatid (iibsato ama aad ku iibiso) maandooriye la oggoleen /daroogooyin sharci daro ah, ma heli doontid faa'iidada FoodShare muddo labba sanno ah marka koowaad ee laguugu helo waxaana

si joogta ah lagaaga saari doonaa tookada labbaad ee laguugu qabto. Haddii aad ku (iibsato ama aad ku iibiso) wax hub ah, rasaas, ama walxo qarxa, faa'iidada FoodShare si joogto ah ayaa lagaaga mamnuuci doonaa.

SIXIIXA – Ka-qeybgalaha/Wakiilka La Oggolaaday	Taariikhda la Sixiixay
--	------------------------

Nambarka Telefoonka

RETAIN COMPLETED FORM IN CASE FILE

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.